Gacanyareha Daryeelka Shakhsiyeed

Waxaad Ka Fekertaa Shaqo ah Daryeelid oo leh Mustaqbal

Ku raaxeyso shaqo ah daryeelka caafimaadka oo ah mid wax weyn ka beddeleysa nolosha dadka



Gacanyareyaasha Daryeelka Shakhsiyeed waxay caawiyaan dadka naafada ah ama xanuunsan ee u baahan in lagu caawiyo daryeelka shakhsiyeed iyo hawlaha nolol-maalmeedka. Dadka qabta shaqadan waxay qofka ku caawiyaan cunta-siinta, qubeyska, labbiska, shanlada, isticmaalka musqusha, iyo in lagu dhex wareejiyo guriga, goob shaqo ama meelo ah bannaanka. Gacanyareyaasha Daryeelka Shakhsiyeed waxay diyaariyaan cuntada, hawsha guriga ee fudud iyo dhardhaqid. Shaqada waxaa lagu qabtaa meelo kala duwan iyadoo ku xiran baahida qofka oo waxaa ka mid ah guriga qofka, goobta shaqada, ama meelo ah bannaanka. Waxaa laga yaabaa in ay shaqadan kugu fiican tahay haddii aad ka hesho in aad si fool-ka-fool ah dadka ula shaqeyso.

SHAQOOYINKA KALE EE LA MIDKA AH DARYEELKA IYO CAAWINA: Daryeelaha, Gacanyareha Daryeelka Guriga, Tusaaleynta Shaqada, Takhasusaadka Adeegyada Taageerada Fiican, Caawiyaha Daryeelka Bukaanka, Direct Support Professional (Shaqaalaha Daryeelka Dadka ama DSP), Caawiyaha Daryeelka Shakhsiyeed, Shaqaalaha Daryeelka Shakhsiyeed, Caawiyaha Daryeelka Dadka Xarunta, iyo in kuwa kale oo ka badan.

Hadda waxaa baahi loo qabaa dad noqda Gacanyareyaasha Daryeelka Shakhsiyeed. Taas macnaheedu waa inay hadda goobaha shaqada shaqaale raadinayaan. Waxaa la filayaa in ay baahida badan ee Gacanyareyaasha Daryeelka Shakhsiyeed sii badan doonto tobanka sano ee soo socda.

WAXBARASHO

Shahaadada dugsiga sare ama tan dadka waaweyn ayaa caadi ahaan looga baahan yahay qofkii u shaqeynaya sidii Gacanyareha Daryeelka Shakhsiyeed, laakiin waxaa jira waxyaabo ka reebban. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

LEYSANKA SHAQADA

Ma jiraan wax leysan daryeele ah oo la isaga baahan yahay. Shaqooyinka qaarkood ayaa la iska rabi karaa leysanka darawalnimada. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

AQOONSIGA SHAQADA

Goobaha shaqada qaarkood waxay rabaan shahaado ah aqoonsi xirfadeed si loogu shaqeeyo. Goobta shaqada weydii shaqaalaha ay rabaan marka ay kuugu yeeraan wareysiga shaqada.

BAARITAANKA SHAQAALAHA

Dadka doonaya inay u shaqeeyaan sidii Gacanyareha Daryeelka Shakhsiyeed waa in ay soo maraan oo la soo baaro taariikhdoodii hore iyo dambiyada sida uu dhigayo sharciga gobolka.

AQOONTA LUUQADAHA

Dadka hadda barta afka Ingiriiska ee ku hadla luuqado kale oo aan ahayn afka Ingiriiska waa ay qaban karaan shaqadan. Inta lagu jiro wareysiga shaqada, weydii goobta shaqada waxa ay rabaan iyo haddii ay u baahan yihiin luuqad aad ku hadli karto markaad shaqeyneyso.

KOBCINTA SHAKHSIYEED

Waxaa jira fursado ah kobcid shakhsiyeed ka dib marka uu qof yeesho khibrad badan oo ah Gacanyareha Daryeelka Shakhsiyeed. Marmar ayey shaqadu bixineysaa kharashka tababar ah aqoonsiga xirfado caafimaad oo aad u sarreeya oo lagu helo lacagta badan. Weydiiso goobta shaqada fursadaha koboca shaqada inta lagu jiro wareysigaaga shaqada.

CareerForce™

Minnesota's Career Resource

Gacanyareha Daryeelka Shakhsiyeed WAA SOCOTAA

MUSHAARKA

Dadka ku shaqeeya Gacanyareha Daryeelka Shakhsiyeed ee Minnesota waxay caadi ahaan qaataan $18.05 ilaa $21.60 saacaddii bishii Maaj 2026. Mushaarku waxa uu ku saleysan yaha meesha looga nool yahay gobolka.

HAWLAHA SHAQADA MAALINTII

- Sameynta daryeel shakhsiyeed, sida caawin ah fariisin, istaagidda iyo dhaqdhaqaaqa ama nadaafadda shakhsiha ah.
- Diyaarinta iyo ambaqaadista qoraallada horumarka qofka iyo adeegyada loo qabtay, in maamulaha ama kormeeraha loo soo sheego isbeddellada xaaladda qofka.
- Sameynta hawlaha la xiriira daryeelka caafimaadka, sida la-socodka calaamadaha muhiimka ah iyo daawooyinka, iyadoo laga hoos shaqeynayo shaqaalaha caafimaadka ee shatiga leh.
- Ka qeybqaadashada dibu-eegista kiiska, la-talinta kooxda daryeeleysa qofka, si aad u qiimeyso baahiyada qofka iyo qorsheynta adeegyada sii soconaya.
- Daryeelka dadka ama qoysaska wakhtiyada ay jirto itaaldarrada, qoyska dhibka qabaan, ama nasashada, wehelinta, daryeelka shakhsiyeed, ama caawin ah la-qabsiga qaab nololeedka cusub.

Daawo fiidiyow ku baxaya afka Ingiriiska oo ah shaqada Gacanyareha Daryeelka Shakhsiyeed.

- Sameynta hawsha guriga, sida karinta cuntada, nadiifinta, dhaqista dharka ama suxuunta, ama adeegyada kale.
- Barista ama talosiinta qofka ee arrimaha, sida nadaafadda guriga, korontada iyo biyaha, nadaafadda shakhsiyeed, nafaqada, ama daryeelka dhallaanka.
- Qorsheynta, dukaameysiga, ama diyaarinta cuntooyin nafaqo leh ama qorsheynta, aadista dukaanka, ama diyaarinta cuntada nafaqada leh.
- Kaxeynta qofka ee meelaha ka baxsan guriga, sida xafiisyada dhakhaatiirta ama bannaanka, adiga oo isticmaalaya baabuur.
- Siinta qofka ee caawimaad ah qalabka lagu hadlo, qorista waraaqaha ama in qofka loo keeno macluumaad.
- Tababarid ah xubnaha qoyska si ay u sameeyaan daryeelka.

SIDA LOOGU HELO SHAQO AH GACANYAREHA DARYEELKA SHAKHSIYEED

Kala hadal shaqaalaha xafiiska CareerForce ee goobta kuugu dhow:

- Booqo CareerForce.MN.gov/locations
- Soo garaac 651-259-7500

Toos ula xiriir goobaha shaqada:

- Shaqooyin ka baaro liiska CareerForce.MN.gov/job-search



CareerForce.MN.gov/CaringCareer

651-259-7500 – Turjubaan ayaa loo diyaarinayaa qofkii naga soo socda.

CareerForce™
Minnesota's Career Resource

10-2026